



Shirkadda Dhextaal

1. WAAJIBAADKA SHAQO EE CUNRA-KARIYAHA

1. Jagada	Cunta-Kariye (chef)
2. Goobta	Garowe, Puntland-Somaaliya
3. Nooca shaqo	Laba gelin
4. U warbixinayaa	Maqal-haye
5. Guud-mar shaqo	Cunta-kariyaha shirkadda u baahan tahay waxaa laga rabaa in uu karin yaqaan cuntooyinka Soomaalida sida bariis, baasto, canjeelo, hilib, kalluunka, digaaga iyo cuntooyinka galka leh (Haruur, soor, geley, canbuulo iyo sarreen) iyo wixii la mid ah.
6. Waajibaadka shaqo	<i>Waajibaadka shaqo ee laga rabo Kariyaha waa;</i> <ul style="list-style-type: none">• Diyaarinta cuntooyin isu dheelitiran oo kala ah Hilib, bariis iyo baasto• Karinta cuntooyinka dhaqanka sida Geley, Garow/haruur, Soor, Canbuulo iyo sarreen• Samaynta kalluunka iyo digaaga foornaysan• Dubidda canjeela Xabashida iyo canjeela Soomaalida• Samaynta noocyada kala duwan ee ukunta• Soo kordhinta cuntooyin cusub oo leh dhadhan, udgoon iyo muuqaal lagu maqsudo.

7. Xirfadda	<p><i>Waa in uu leeyahay Kariyuhu xirfadaha soo socda;</i></p> <ul style="list-style-type: none"> • <i>U adeegidda macaamiisha</i> • <i>Samaynta cunti isu-dheelitiran</i> • <i>Adeegsiga miishanada wax lagu kariyo</i> • <i>La shaqaynta koox</i> • <i>Ku hadalka iyo qoridda Soomaaliga iyo Ingiriiska</i>
8. Waaya-aragnimada	<p><i>Waa in uu leeyahay Cunta-Kariyuhu waaya-aragnimo ugu yaraan saddex sano</i></p>
9. Aqoontan	<ol style="list-style-type: none"> 1. <i>Food Science and Nutrition (FN) ama Shahaado u dhigmata ama</i> 2. <i>Dugsi sare iyo shahaado ka saraysa oo ah cunta karinta</i>
10. Tix-raac	<p>Haddii aad buuxin kartid shuruudaha la iska rabo, aadna doonaysid in aad codsatid shaqadaan fadlan ku soo dir Taariikh-nololeedkaaga (CV and a cover letter) iyo 2 damiin (References) ugu danbayn 11-17/02/2018 ciwaankaan dhextaalrestaurantandcafe@gmail.com ama wac 0906551320</p>